



Rasuulkii Ilaahayow, kama aanan tegin dambi wayn iyo dambi yar oo waan wada sameeyey, wuxuu Nabiga ku yiri : .miyaadan qirayn inuu Ilaahay maahee Ilaah kale jirin Maxamadna Rasuulka Ilaahay yahay?

Anas allaha ka raali noqdee waxaa laga wariyey inuu yiri: Nabiga naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee waxaa u yimid nin wuxuuna ku yiri: Rasuulkii Ilaahayow, kama aanan tegin dambi wayn iyo dambi yar oo waan wada sameeyey, wuxuu Nabiga ku yiri : .miyaadan qirayn inuu Ilaahay maahee Ilaah kale jirin Maxamadna Rasuulka Ilaahay yahay? saddex jeer ayuu ku celiyey. wuxuu yiri: haa, wuxuu yiri: dambiyadaas shahaadateynka ayaa lagu dhaafay.

[Xadiis Saxiix ah] [waxaa wariyey Abuu yaclaa,dabraani,diyaa.ul madasi]

Nin ayaa u yimid Nabiga naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee wuxuuna ku yiri: Rasuulka Ilaahayow, anigu dambi walba waan sameeyey, mid yar iyo mid weynba midna maanan dhaafine dambi dhaaf ma leehay? Wuxuu ku yiri Nabiga-naxariis iyo nabadi korkiisa aha ahaatee miyaadan qirsanayn inuu Ilaahay maahee Ilaah kale jirin Maxamadna Rasuulka Ilaahay yahay? wuxuu ugu cel-celiyey saddex jeer. Wuxuu ugu jawaabay: haa waan qiraya. Wuxuu u sheegay Nabigu naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee fadliga labada shahaado iyo in lagu dhaafo dambiyada, towbaduna ay masaxdo wixii ka horeeyey ee dambi ahaa.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65006>

